



Tilmaamo Buuhiyowky Shuruutho

Si adi ing nagity qof ing qalimi ku-qiiib qaadidiowky barnaamijky Legal Food Hub, dadky ku qiiib qaadidaw may liku fadeeyi iny buuhiyaang shuruutho ha so'di:

1. May likoo fadeeyi iny haati Beeriley, Gana'si Raashing e, imby Urur ku shaqeeyaw Beer imby Raashing, sidy hoos liky sheegi, o ki taali waany ki shaqeeyaw gobolky Maine, Massachusetts, Rhode Island, Connecticut, New Hampshire, imby Vermont.

- a. Beeriley: Qof, kooh shaqsiyaad eh, imby gana'si inti bading ku shaqeeyaw abuurky dalagy imby dhaqishithy hoola o liinky tili gali iny li gadi (may ki jaree beero biyo ki saleysing, dadky beeridaaw dhirty mi-daawaadky eh i ubahyidy o biyaaw badee'ooyin raashing o li aami kori o liky abuuraw New England; **IMBY**
- b. Gana'si Raashing: Qof, kooh shaqsiyaad eh, imby gana'si diyaariyaaw, qiiibiyaaw, aruuriyaaw, keydiyaaw, imby suuq jeeyaw raashing imby badee'ooyin raashing o qiimi liki kordhiyi o liinky tili gali isti'maalky dadky, mayni ki jaree edeegyidy raashin-kariyowky i baaburty raashinky liki gadaaw. Saas o kali, may liku fadeeyi iny usi haku gadidi inky yaraang 3 noo' o raashing eh imby wala raashing liki daraaw o liki abuuri imby laha ki saari New England; **IMBY**
- c. Urur ku shaqeeyaw Beer imby Raashing: Urur faa'idi weydis ing haayni o ujeedidiis inky wiing eti aawiyowky beerileydy imby gana'siyidy raashinky e New England (sidy urur gana'si o taageraw beerileydy imby haruung raashin o faa'idi weydis ing haayni), **IMBY** kooh imby urur bulshi o himilidiis inky wiing eti wal-ku-qobithowky arrimo adaalidy bulshithy o la hariirty nidaamky raashinky (sidy suuqi beerileydy, iskaashi dukaan raashin, imby urur beered bulshi).

*Muqaayitho i shaqaalaha muqaayitho miki jaraang dadky liing tih-giliyaaw Gana'si Raashin midy li rahaaw qeehitaanking.

2. Beerileydy i Gana'siyidy Raashinky may liku fadeeyi iny buuhiyaang shuruutho ha so'odi:

- a. Dakhligy haku galaaw beerty imby gana'sigy raashinky may liku fadeeyi iny usi nagidi il ku mid eh nolol-maalmeedky beerileydy imby milkiiligy gana'sigy raashinky; **MAY KALE SHARDI AHAA**
- b. Dakhligy saafigy eh o sinid kasty eh e beerileydy imby gana'sigy raashinky (o ki jarti beesidy milkiiligy kuli bahaaw gana'sigy) may liku fadeeyi iny inku badinaani \$40,000.



- Beerileydi, si liing go'aamiyi dhakhligy saafigy eh o sinid kasty eh, fiiri sadarky 34 e Schedule F (Form 1040) e foomky hogty anshuurty liki gudbiyaaw.
- Gana'siyidy Raashinky, si liing go'aamiyi dhakhligy saafigy eh o sinid kasty eh, isti'maal foomky anshuurty e khuseeyi: Gana'siyidy leyi hal qof i LLC-yidy liing anshuuraw saas may isti'maalayana sadarky 31 e Schedule C (Form 1040); Iskaashiyidy i LLC-yidy liing anshuuraw iskaashi ahaan may isti'maalayana sadarky 22 e Form 1065; C Corporations may isti'maalayana sadarky 30 e Form 1120; S Corporations may isti'maalayana sadarky 21 e Form 1120S; **MAY KALE SHARDI AHAA**
- c. Dakhliidy o sinid kasty eh e qoysky beerileygy imby milkiiligy gana'sigy raashinky may liku fadeeyi iny inku badinaani [400% Heerky Saboolnimidy Federaalky](#). Dakhligy liinku kasbini shaqi imby gana'si may liku fadeeyi iny liki dari hisaanting, hataa hooby isti'maalky dakhligaas haddidinyi (Sidi beesi ki jarti sanduug imby amaani haddiding). Si adi ing ogaati dakhligy sinid kasty e qoyskaa, fiiri Sadarky 9 e foomky hogty anshuurty dakhligy shakhsigy e (Form 1040). Tilmaamo hati jari e Heerky Saboolnimidy Federaalky ya hoos ki qoring, imby taaboy [meeling](#) si adi inky akhriidi PDF ahaang. Raadi tiridy qoyskaa ku koobingyi i joo-u-taahgy liki alaamitheeyi “400% FPL”. Hooby gana'sigy leyi milkiiliyaal bading, gana'sigy ing qalimi kori hooby dhammaang milkiiliyaalky si gaar eh imby si wadajir eh ing buuhiyaang shuruudi dakhligy.
- Hadky liing dajiyi dakhligy saafigy eh e sinid kasty i dakhligy qoysky may ki dabaqaaw midy li qiimeyaaw ing-qalimoowky Ururidy Beero imby Raashinky.

Tilmaamo Heerky Saboolnimidy Federaalky e 2026

Inti Qof e Qooski Ku Koobinyi	400% Heerky Saboolnimidy Federaalky
1	\$63,840
2	\$86,560
3	\$109,280
4	\$132,000
5	\$154,720
6	\$177,440
7	\$200,160
8	\$222,880



Si adi inky qalinti barnaamijky Legal Food Hub, dakhligy qooskaa mi dhaafi kori qadarky ki qoring joog-u-taahgy midigti eh midy liing fiiriyaaw inti qof e qooski ku koobinyi o ki qoring joog-u-taahgy bidi.

*Walaagi faahfaahin dheeri e, fiiri [Tilmaamo Heerky Saboolnimidy Federaalky](#).

3. Beerileydi shaqsiyaadky eh i shaqsiyaadky ku shaqeeyaw Gana'si Raashin, edeegyidy shar'i e adi odsidaasi may liku fadeeyi iny inki horeeng si toos eh ing li hariirang hoologaa beerileynimi, Gana'si Raashing imby Urur Beer imby Raashing.

Shuruudoging may wal liku badaleey 17-di Juun, 2026. May liing dejiyey iny liki aqoonsidi Beerileydi i Gana'sitidy Raashinky o Dakhlishoo hooseyi, i saas o kali beero i gana'siyidy ku shaqeeyaw heer yar ilaa heer dhahdhahaad eh. May ha dhowaayane talooying i ra'yi ki saabsing shuruuthoging ing-qalimoowky.

Shuruuthoging ing-qalimoowky way hegaayana go'aan qaadishidi CLF; si walbi o haati, CLF may haq ing letaa iny go'aani ku deerti kiis kasty si gaar eh, o ki jarti iny diidi gudbiyowky imby meeleyowky kiisisky.